



WASHINGTON STATE Department of Children, Youth, and Families

Kharashka Shacabka: Kharashka Shuruucda Laanta Socdaalka ee Lagu Taliyay

Adeegyada Qoysasku Helaan Dhalasho ilaa Sadex Jirka (ESIT) ee Ay Tahay Inaad Ogaato

Waa maxay “kharashka shacabku”?

“Kharashka shacabku” waxa uu ahaa sharci kamid ah shuruucda laanta socdaalka 100 sano wax ka badan. Waxaa loo abuuray si loo aqoonsado dadka ku tiirsanaan kara gunooyinka dawlada kuwaas oo ay u noqonayso isha dhakhligu kasoo galo. Hadii dawlada Maraykanku u aragto in qof ay u badan tahay inuu noqdo “kharashka shacabka,” waxaa loo diidi karaa soo gelida Maraykanka ama waxaa loo diidayaa arjiga dagagaanshaha rasmiga ah ee sharciga ah. Waaxda Amniga Arrimaha Gudaha waxay wakhtigan ku talinaysaa in wax ka badal lagu sameeyo sharciga “kharashka shacabka” ee wakhtigan.

Sidee ayuu sharciga kharashka shacabka adiga kuu taabanayaa?

Sharcigani ma khuseeyo dhamaan qoysaska soo galaytiga ah oo dhan. Sharciga wakhtigani waxa uu khuseeyaa:

- Qoysaska Maraykanka ee dalbanaya fiise qoys ama deganaansho ramsi ah (giriin kaadh)
- Dadka soo galaytiga ee doonaya sharci ay Maraykanka kusoo galaan

Sharciga wakhtigan ma khuseeyo:

- Dadka sharciga ku degan ee dalbadana dhalashada Maraykanka
- Dad badan oo soo galayti ah oo leh sharci oo ay kamid yihiin qaxootiga, dadka magan galyo doonka ah, dadka ka badbaaday tacadiga guriga dhaxdiisa ah, dalbadaha iyo sidata fiisaha T ama U, caruurta u baahan Xaalad Gaar ah oo Soo Galayti oo Xaalad Xabsiga Caruurta ah

Maxaa isbedeli kara?

Sida uu dhigayo sharciga wakhtigan:

- Kaliya gunooyinka lagu xisaabtamayo ayaa la eegaa cida ay u badan tahay inay noqoto “kharashka shacabka” taas oo ah
 - Kaalmo lacageed sida **Dhakhliga Dheeraadka ah ee Amniga (SSI)** iyo **Kaalmada Kumeel Gaadhka ah ee Qoysaska Baahan (TANF)**
 - **Daryeelka mudada dheer** ee dawlada maalgaliso

Sharciga lagu taliyay waxa uu dawlada u sahlayaa inay sidoo kale eegto isticmaalka gunooyinka kale ee shakhsiyadka ka caawinaya inay buuxiyaan baahiyahooda rasmiga ah. Waxaa ka mid ah:

- Medicaid aan xaalada degdeg ah ahayn
- Barnaamijka Caawinta Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)
- Kaabista Dakhliga Medicare Qaybta D

- Kaalmada guriyaynta, sida guryaha shacabka ama Qaybta 8 ee fagtuurka guryayta iyo kaalmada kirada

Sidoo kale, sharciga lagu taliyay waxaa kamid ah qaab dhakhli oo cusub oo saamayn kara qoysaska dhakhligoodu hooseeyo.

Macluumaad muhiim ah oo ay tahay inay qoysasku ogaadaan:

- **Sharciyada lagu taliyay wakhtiga weli sharci maaha.** Sharciyada weli lama dhamaystirin, taas oo qaadan karta bilo. Hadii sharciga la dhamaystiro, waxaa dhici karta inayna dhawr todobaad ama bilo dhaqan galin marka nuqulka ugu danbeeya la baahiyo.
- **Sharcigu maaha dib u dhac.** Tani waxay ka dhigan tahay -- marka laga tago wixii lacag ah ama daryeelka mudada dheer ee ay dawladu bixiso -- ee la isticmaalayay sharciga intaa la dhamaystirin kahor ee aanu dhaqan gelin ma eegi doono marka la eegayo kharashka shacabka.
- **Tijaabada kharashka shacabku waxa la iskula eegey xaaladaha wanaagsan iyo kuwa xunba.** Xataa hadii sharcigu isbadalo, qaadashada gunada shacabku kama dhigna in si toos ah la iskugu diidayo arjiga soo galaytiga. Saraakiisha laanta socdaalku waa inay eegaan dhamaan xaaladaha marka ay go'aaminayaan hadii ay u badan tahay inaad noqonayso kharashka shacabka mustaqbalka iyo in kale. Waxyaaba la is eegayo waxaa kamid ah da'daada, caafimaadkaaga, dhakhligaaga, hantidaada, khayraadka aad haysato, waxbarashadaada/xirfadahaaga, taageerada qoyska, iyo qoyska ku taageeri doona.
- **Adeegyada Dhalasho ilaa Sadex Sano Jir ama Taageerada Hore ee Sabiga iyo Ilmaha Socod-baradka ah (ESIT) laguma eegin tijaabada kharashka shacabka.** Xataa hadii lasoo gabo gabeeyo sharcigan, adeegyada lagu bixiyay ee hoos yimaada Sharciga Waxbarashada Qofka Laxaadka La', oo ay kamid yihiin adeegyada ESIT, laguma qaadan doono tijaabada kharashka shacabka, kuwaas oo ay kamid yihiin kuwa laga qaado Medicaid.
- **Hel kaalmo marka aad go'aansanayso waxa qoyskaaga u wanaagsan, oo hadii aad awoodo, kala tasho qareen laanta socdaalka ah xaaladaada.** Si aad meesha aad degan tahay uga hesho hay'ad bixisa adeegyada sharciga ah ee laanta socdaalka ah oo jaban, booqo: <https://www.immigrationadvocates.org/nonprofit/legaldirectory/>. Bixiyaha adeega lagu kalsoon yahay waxa sidoo kale laga heli karaa liiska khayraadka deegaanka, hadii aad kaalmo u baahan tahay.